



**Waaxda Booliiska Minneapolis  
Buugga Xeerka iyo Nidaamka Booliiska**

Lambar:  
5-300

**Mujallada shanaad - Xeerka Anshaxa iyo Isticmaalka Xoogga**

**Isticmaalka Xoogga**

**5-313 Doorashada Xakamaynta - Haamaha Kiimikada**

(10/16/02) (08/16/07) (xx/xx/23)

**I. Ujeedo**

Ujeedada xeerkan ayaa ah in la ballaariyo shuruudaha xeerarka kale ee xoogga, gaar ahaan kuwa la xiriira haanta kiimikada

**II. Qeexitaano**

**Haamaha kiimikada:** Haamaha loogu talagalay in lagu gudbiyo walxaha kiimikaadka ee laga rido qoriga ama laga rido gacanta.

**Erayada lagu qeexay P&P 5-302:**

- Qaadis
- Geyn
- Ridista
- Muujin
- Ku howlan la beegsadaha
- Ku taagis
- Isticmaal

**III. Xeer**

**A. Xeerka iyo Mabaadi'da Hagidda**

Marka lagu daro u gaar ahaanshaha xeerkan, shaqaaluhu waa inay raacaan shuruudaha dhammaan xeerarka kale ee khuseeya, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, Mabaadi'da Hagidda iyo heerarka kale ee P&P 5-301.

**B. Waafaqsan Xeerka iyo Tababarka**

Saraakiishu waa inay u isticmaalaan oo kaliya haamaha kiimikada si aan kala sooc lahayn (non-discriminatory), waana marka aw xooggaasi macquul yahay oo uu waafaqsanyahay tababarada MPD ee hadda jira iyo xeerarka MPD ee xukuma isticmaalka xoogga (oo ay ku jiraan dhammaan qaybaha P&P 5-300).

**C. Rabshadaha Madaniga ah iyo Isku-imaanshaha**

Dhammaan isticmaalka haamaha kiimikada ee ujeedooyinka xakamaynta dadka ama inta lagu jiro rabshadaha madaniga ah iyo isku-imaanshaha waa inay dhacaan kaliya si waafaqsan P&P 7-805.

**D. Tababar Loo Baahan Yahay**

Haamaha kiimikada waa uu isticmaalaa kaliya shaqaalaha si guul leh u dhammaystay tababar la ansixiyay.

**E. Haamaha Kiimikada ee ay Waaxdu soo Saartay**

Saraakiisha MPD ayaa loo fasaxay kaliya inay isticmaalaan haamaha kiimikada ah ee ay bixiso waaxdu.

**F. Kaliya loogu talagalay isticmaalka SWAT (Hubka Gaarka ah iyo Xeeladaha)**

Haamaha Kiimikada ah waxa kaliya oo isticmaali kara shaqaale u tababaran Hubka Gaarka ah iyo Xeeladaha (SWAT) iyagoo raacaya amarka Taliyaha Ilaalada ee heeganka ah ama Taliyaha SWAT.

**G. Adeegyada Degdegga ah**

Marka haamaha kiimikada la isticmaalo, Waaxda Dab-damiska iyo ambalaasku waxay heegan ku ahaan doonaan masafo badbaado leh oo u dhow aagga bartilmaameedka.

**H. Qaadista gasaca keemikada la riday**

Ka dib marka la sugo goobta, xubnaha kooxda SWAT waa in ay meesha ka qaadaan oo ay tuuraan gasacadaga aaga yaal.

**I. Daawaynta iyo Gargaarka Caafimaadka**

1. Marka lagu daro daawaynta caadiga ah ka dib isticmaalka xoogga (sida ku cad qaybta P&P 5-301), daawaynta ka dib marka qofka uu la kulmo walax kiimiko waa in uu ku jiraa mid ama ka badan kuwan soo socda:
  - Ka saar qofka ay wax gaareen aaga sumeysan.
  - U bandhig qofka suntu gaartay hawo nadiif ah.
  - Ka raaci indhaha iyo maqaarka qofka sumeysan biyo qabow (haddii la heli karo).
2. Shaqaalaha la dhaariyay waa in uu si dhaw ula socdaa qofka sunta kiimikada gaartay ilaa lagu wareejiyo shaqaalaha caafimaadka ama kuwa kale ee sharci fulinta.
3. Askariga wareejinaya haynta qofka sunta kiimikada gaartay waa inuu ku wargeliyaa hay'adda la wareegeysa haynta in qofka ay gaartay sunta kiimikada.

**J. Cadayn u samaynta**

Saraakiishu waa in ay diiwaangeliyaan isticmaalka haamaha kiimikaada si la mid ah adeegsiga xooga si waafaqsan xeerka xoogga warbixinta (P&P 5-302).

DRAFT